




DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

XAFIISKA XISAABIYAHHA GUUD

| | 2020 | 2021 | 2022 | 2023 | 2024 |
|------------------------|----------------|----------------|----------------|----------------|----------------|
| Tax Revenue | 139,529,217 | 162,766,910 | 181,691,842 | 224,631,762 | 266,763,916 |
| Other Revenue | 71,704,628 | 66,794,410 | 80,977,903 | 104,859,950 | 102,589,875 |
| Total Domestic Revenue | \$ 211,233,845 | \$ 229,561,321 | \$ 262,669,745 | \$ 329,491,711 | \$ 369,353,791 |

WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYAD SANNADEEDKA - BISHA JANAAYO 2026

Domestic Revenue Vs External Grants



Jaantuska 2aad: Dhabta Dakhliga Canshuurta Jan 2025



APRIL 2026

WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYADDA

Bisha Janaayo 2026

WAXAA SOO SAARAY WARBIXINTAAN

XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD EE DAWLADDA

WAXAAD KA HELI KARTAAN WARBIXINTAAN BOGGA XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD

www.oags.gov.so

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda
Degmada Shangani
Mogadishu – Somalia
Email: reporting@oags.gov.so

| | |
|--|-----------|
| HORDHAC | 1 |
| DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026 | 2 |
| DAKHLIGA DAWLADDA BISHA JAN 2026 & 2025 | 3 |
| DAKHLIGA CANSHUURAHA | 5 |
| DAKHLIYADA KALE | 7 |
| DEEQAHA DIBADDA | 7 |
| DHABTA KHARASHAADKA JAN- EE MIISAANIYADDA SANNADKA 2026 | 9 |
| DHABTA KHARASHAADKA BISHA JAN, HAY'ADAHA DAWLADDA | 12 |
| KHARASHAADKA JOOGTADA AH | 12 |
| KHARASHAADKA MASHAARIICDA | 13 |
| Lifaaqa 1^{aad}: Faahfaahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah Jan | 14 |
| Lifaaqa 2^{aad}: Faah-faahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Jan- 2026 | 50 |

Liiska Jaantusyada

| | |
|---|----|
| Jaantuska 1 ^{aad} : Dhabta Dakhliga Dawladda – Bisha Jan 2026 & 2025 | 4 |
| Jaantuska 2 ^{aad} : Isbarbardhig Dakhliga Gudaha – bilaha Jan 2026 & 2025 | 4 |
| Jaantuska 3 ^{aad} : Qaybaha Dakhliga Gudaha Jan 2026 | 5 |
| Jaantuska 4 ^{aad} : Dakhliga Canshuuraha Jan 2026 & 2025 | 7 |
| Jaantuska 5 ^{aad} : Deeqaha Dibadda Jan 2026 & 2025 | 8 |
| Jaantuska 6 ^{aad} : Kharashaadka Joogtada ah, Bisha Jan - 2026 & 2025 | 10 |
| Jaantuska 7 ^{aad} : Kharashaadka Mashaariicda, Bilaha Jan-Juun - 2026 & 2025 | 11 |

Liiska Shaxaha

| | |
|--|----|
| Shaxda 1 ^{aad} : Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan 2026 | 2 |
| Shaxda 2 ^{aad} : Dhabta Dakhliga Jan 2026 & 2025 | 3 |
| Shaxda 3 ^{aad} : Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan ee sannadaha 2026 & 2025 | 5 |
| Shaxda 4 ^{aad} : Deeqaha Dibadda Jan 2026 & 2025 | 8 |
| Shaxda 5 ^{aad} : Dhabta & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda Jan- 2026 | 9 |
| Shaxda 6 ^{aad} : Kharashaadka la bixiyey Bisha January 2026 iyo 2025. | 11 |
| Shaxda 8 ^{aad} : Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda | 12 |

HORDHAC

Warbixinta fulinta miisaaniyadda waa warbixin bille ah, waxayna faahfaahinaysaa fulinta ama dhaqangelinta miisaaniyad sannadeedka 2026. Waxayna isbarbardhig ku samaynaysaa dakhliga dhabta ah ee lasoo uruuriyey iyo kharashaadka Dawladda ee la bixiyey sannadka gudahiisa iyo miisaaniyad sannadeedka dakhliga iyo kharashaadka dawladda. Miisaaniyadu waxay waafaqsan tahay miisaaniyad sannadeedka 2026 oo ay ansixiyeen labada aqal ee baarlamaanka.

Wadarta Dakhliga Gudaha ee miisaaniyad sannadeedka 2026 ayaa ah **\$479M** wuxuuna ka yahay **35%** wadarta miisaaniyadda dakhliga Dawladda, halka wadarta deeqaha dibadda oo isugu jirta kab miisaaniyaddeed iyo mashaariic ee ku jiray miisaaniyadda ay tahay **\$879M** oo **65%** ka ah wadarta dakhilga miisaaniyad sannadeedka 2026.

Wadarta miisaaniyadda asalka ah ee Kharashaadka Joogtada ah ayaa ah **\$682M** waxayna ka tahay **49%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud, halka miisaaniyadda asalka ah kharashaadka mashaariicda ay tahay **\$704M** waxayna ka tahay **51%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2026.

Dakhliga Gudaha ee la helay bisha Jan 2026 ayaa ahayd **\$33M** wuxuuna ka badan yahay **24%** dakhliga gudaha ee la helay Bisha Jan 2025. Sidoo deeqaha dibadda ee la helay bisha Jan 2026 ayaa ahayd **\$10M** waxayna ka badan tahay **92%** deeqaha dibadda la helay bisha Jan 2025.

Wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee la bixiyey bisha Janaayo 2026 ayaa ahayd **\$26M** waxayna ka badan tahay **10%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha Janaayo ee sannad maaliyadeedkii hore ee 2025.

Warbixintaan ayaa ka koobnaan doontaa saddex qaybood. Qaybta koowaad ee warbixinta fulinta miisaaniyadda oo lagu faahfaahin doonaa dhabta dakhliga Dawladda; Dakhliga Gudaha iyo Deeqaha Dibadda, iyadoo la isbarbardhigi doono dhabta dakhliga iyo miisaaniyad sannadeedka qaybaha dakhliga Dawladda ka kooban tahay.

Qaybta labaad ee warbixinta waxaa lagu faahfaahin doonaa kharashaadka dawladda ee la bixiyey bisha Janaayo 2026, iyadoo loo fiirinaayo waafaqsanaanta sida loogu ansixiyey miisaaniyad sannadeedka 2026. Waxaana loo kala qaadi doonaa kharashaadka dawladda labo qaybood; kharashaadka Joogtada ah iyo kharashaadka mashaariicda.

Warbixinta qaybta saddexaad waxaa ku lifaaqan faahfaahinta isticmaalka miisaaniyadda ee hay'adaha dawladda, loona kala qaaday sida ay hay'adaha u fuliyeen kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda ee miisaaniyad sannadeedka 2026. Lifaafa koowaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa shax faahfaahsan oo ah isticmaalka hay'adaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, lifaaqa labaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa shaxda isticmaalka hay'adaha ee kharashaadka miisaaniyadda mashaariicda 2026. Lifaafa 3^{aad} soo koobid fulinta mashaariicda.

DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2026

Wadarta dakhliga ee kutalagka miisaaniyadda ayaa ah \$ **1,357,811,103** oo la filaayo in ay Dawladda soo uruuriso sannad maaliyadeedka 2026 gudihiisa. Miisaaniyada Dakhliga Gudaha ayaa ahayd \$ **478,974,645** oo **35%** ka ah wadarta miisaaniyad sannadeedka, halka deeqaha dibada la filaayo in la soo xareeyo ay tahay \$ **878,836,458** oo **65%** ka ah wadarta miisaaniyadda dakhliga ee sannadka 2026.

| | Faah-Faahin | Dhabta Jan 2026 | Kutalagalka Hore | % Fulinta |
|-----|---|---------------------|----------------------|-----------|
| | Canshuuraha | | | |
| 111 | Canshuurta Dakhliga & Faaiidooyinka | 3,471,427 | 53,262,627 | 7% |
| 114 | Canshuurta Adeegga & Agabka | 5,945,998 | 77,001,675 | 8% |
| 115 | Canshuurta Ganacsiga Dibadda | 14,502,392 | 182,424,346 | 8% |
| 116 | Canshuuraha Kale | 329,251 | 14,412,241 | 2% |
| | Wadarta Canshuurta | 24,249,067 | 327,100,889 | 7% |
| | Dakhliyada Kale | | | |
| 141 | Dakhliga Hantida | - | 3,244,397 | 0% |
| 142 | Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga | 8,957,754 | 145,284,670 | 6% |
| 143 | Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha | 12,103 | 1,089,067 | 1% |
| 145 | Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyink | - | 2,255,623 | 0% |
| | Wadarta Dakhliyada Kale | 8,969,857 | 151,873,756 | 6% |
| | Wadarta Dakhliga Gudaha | 33,218,924 | 478,974,645 | 7% |
| | DEEQAHA DIBADDA | | | |
| 131 | Deeqaha laba dhinac | - | 27,000,000 | 0% |
| 132 | Deeqaha Dhincacyada badan | 10,031,126 | 851,836,458 | 1% |
| | Wadarta Deeqaha Dibadda | 10,031,126 | 878,836,458 | 1% |
| | Wadarta Dakhliga Dawladda | 43,250,050 | 1,357,811,103 | 3% |
| | Iibka Hantida & Daymaha | | | |
| 165 | Iibka Hantida | - | - | 0% |
| | Wadarta Iibka Hantida | - | - | 0% |
| 15 | Daymaha | | | |
| 151 | Daymaha Gudaha | - | - | 0% |
| | Wadarta Daymaha Gudaha | - | - | 0% |
| 32 | Hantida Maaliyadeed | | | |
| 321 | Hantida Maaliyadeed | 382,726 | - | 0% |
| | Wadarta Hantida Maaliyadeed | 382,726 | - | 0% |
| | Wadarta Lacag Qabashada Guud | \$43,632,777 | - | 0% |

Shaxda 1^{aad}: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan 2026

Shaxda 1^{aad} waxay soo bandhigaysaa dhabta dakhliga ee la soo uruuriyey bisha Janaayo iyo miisaaniyad sannadeedka 2026. Wadarta dakhliga la helay bisha Janaayo ayaa ah \$**43M** oo u dhiganta **3%** miisaaniyad sannadeedka 2026. Dakhliga Gudaha waxaa ka soo xarooday \$**33M** oo ay ka tahay **77%** wadarta dakhliga dawladda ee la helay bisha Janaayo 2026, sidoo kale deeqaha dibadda ayaa la helay \$**10M** una dhiganta **23%** wadarta dakhliga dawladda ee bisha Janaayo 2026.

Wadarta dakhliga la helay bisha Janaayo ayaa ahayd \$**43M** oo **3%** ka ah wadarta dakhliga miisaaniyad sannadeedka 2026. Dakhliga Gudaha ayaa lasoo uruuriyey \$**33M** oo u dhiganta **7%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha. Deeqaha Dibadda ayaa la helay \$**10M** oo **1%** ka ah miisaaniyad sannadeedka 2026 ee wadarta deeqaha dibadda.

Wadarta Hantida Maaliyadeed ee la helay bisha Janaayo 2026 ayaa ah \$**383K** Dawlada ayaa horay u siisay bangiyada gaarka loo leeyahay si ay maalgalin dayn ugu siiyaan ganacsiyada yaryar ee dalka. Marka ay soo celiyaan ganacsata, bangiyada ayaa dib ugu soo celinaayo dawladda.

Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ayaa la helay bisha Janaayo dakhli dhan **\$3.5M** oo u dhiganta **7%** wadarta miisaaniyad sannadeedka canshuurtaan. Canshuurta Agabka iyo Adeegga ayaa la soo uruuriyey **\$6M** oo ah **8%** miisaaniyadda sannadka. Sidoo kalane Canshuurta Ganacsiga Dibadda ayaa lasoo xareeyay **\$15M** oo u dhiganta **8%** bisha Janaayo miisaaniyad sannadeedka 2026. Dakhliyada kale waxaa la soo uruuriyey bisha Jan 2026 dakhli dhan **\$9M** oo u dhiganta **6%** miisaaniyad sannadeedka 2026.

Deeqaha dhinacyada badan waxaana lasoo uruuriyey bisha Janaayo **\$10M** oo u dhiganta **1%** miisaaniyad sannadeedka 2026.

DAKHLIGA DAWLADDA BISHA JAN 2026 & 2025


Dakhliga Dawladda wuxuu ka soo xaroodaa dakhliga gudaha iyo deeqaha dibadda. Dakhliga Gudaha ayaa loo kala qaadaa dakhliga canshuuraha iyo dakhliyada kale. Shaxda 2^{aad} waxay isbarbardhigaysaa dhabta dakhliga Dawladdu heshay bisha Jan ee sannadaha 2026 iyo 2025.

| Faah-Faahin | Dhabta Dakhliga Jan 2026 | Dhabta Dakhliga Jan 2025 | Koror/ Naaqus |
|--|--------------------------|--------------------------|---------------|
| Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadda | \$43,250,050 | \$ 31,985,566 | 35% |
| Dakhliga Gudaha | 33,218,924 | 26,769,070 | 24% |
| Dakhliga Canshuuraha | 24,249,067 | 8,822,510 | 29% |
| Canshuurta Dakhliga & Faa'idooyinka | 3,471,427 | 2,426,887 | 43% |
| Canshuurta Adeegga & Agabka | 5,945,998 | 4,131,345 | 44% |
| Canshuurta Ganacsiga Dibadda | 14,502,392 | 12,002,026 | 21% |
| Canshuuraha Kale | 329,251 | 262,252 | 26% |
| Dakhliyada Kale | 8,969,857 | 7,946,560 | 13% |
| Dakhliga Hantida | - | - | 0% |
| Dakhliga libka Agabka iyo Adeegga | 8,957,754 | 7,941,213 | 13% |
| Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha | 12,103 | 5,347 | 126% |
| Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyinka hadda jira aynu lee nahay | | | |
| DEEQAHA DIBADDA | 10,031,126 | 5,216,496 | 92% |
| Deeqaha laba dhinac laha | - | 927,174 | -100% |
| Deeqaha Dhinacyada badan | 10,031,126 | 4,289,322 | 134% |

Shaxda 2^{aad}: Dhabta Dakhliga Jan 2026 & 2025

Sida ka muuqato shaxda 2^{aad} dakhliga Dawladda ee la helay bisha Jan 2026 ayaa ahaa **\$43M**, wuxuuna ka badan yahay **35%** wadarta dakhliga Dawladda ee la helay bisha Jan 2025. Dakhliga gudaha ayaa la helay **\$33M**, wuxuuna ka badan yahay **24%** wadarta dakhliga gudaha ee la helay bisha Janaayo 2025. Halka deeqaha dibadda la helay **\$10M** oo ay ka badan tahay **92%** wadarta Deeqaha Dawladda ee la helay bisha Jan 2025.

Canshuurta Agabka iyo Adeegga ayaa la soo uruuriyey bisha Jan 2026 dakhli dhan **\$6M** waxayna ka badan yahay **44%** Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bisha Jan 2025. Kororka ugu badan ee canshuurtan waxay ka timid Canshuuraha libka - Canshuuraha Kale libka ee la helay bisha Jan 2026.



Jaantuska 1^{aad}: Dhabta Dakhliga Dawladda – Bisha Jan 2026 & 2025

Dakhliga Gudaha ee la helay bisha Jan 2026 ayaa ahaa **\$33M** waxaana la helay **\$6.5M** oo dheeraad ah marka loo fiiriyo dakhliga gudaha ee la helay bisha Janaayo 2025. Deeqaha dibadda ee la helay bisha Janaayo 2026 ayaa ah **\$10M** waxayna ka sareysaa **\$5M** deeqaha dibadda ee la helay bisha Jan 2025.


Deeqaha dibadda ayaa laga kala helay:

Bangiga Adduunka oo laga helay lacag dhan **\$9M**, Hay'ada Waxbarashada Addunnka (GPE) waxaa laga

helay **\$911K** iyo Mashruuca Xoojinta Xogta Cilmi barista oo laga helay lacag dhan **\$ 25K**.

DAKHLIGA GUDAHA


Odooroska miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha ayaa ahayd **\$479M**, waxaana la helay bisha Janaayo 2026 dakhli dhan **\$33M** oo u dhiganta **7%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha. Dakhliga Gudaha ee la helay bisha Janaayo ee sannadka 2026 ayaa **24%** ka badan dakhliga gudaha ee la helay bisha Janaayo ee sannadka 2025.



Jaantuska 2^{aad}: Isbarbardhiq Dakhliga Gudaha – bilaha Jan 2026 & 2025

Sida ka muuqata jaantusta 2^{aad}, wuxuu muujinayaa isbarbardhiga dakhliga gudaha ee la helay bisha Janaayo ee sannadaha 2026 iyo 2025. Dakhliga gudaha ayaa kordhay Bisha Jan ee sannadka 2026, wuxuuna ka badan yahay **24%** dakhliga gudaha ee la helay bisha 2025.

Bisha kowaad ee sanadka 2026 Dakhliga Gudaha ayaa ahaa **\$33M** wuxuuna ka badan yahay Dakhliga la helay bishii Kowaad ee sanadkii 2025.



Dakhliga gudaha ayaa laga kala helay dakhliga canshuuraha iyo dakhliyada kale. Sida ka muuqato jaantuska 3^{aad}, dakhliga gudaha ee la helay bisha Janaayo ee sannadka 2026, wuxuu **73%** kasoo xarooday dakhliga canshuuraha, halka **27%** kasoo xarooday dakhliyada kale.

Dakhliga canshuuraha ayaa ka soo xarooday canshuuraha kala duwan ay dawladdu qaado, waxaan ugu badan cansuurta kasoo xarooto furdada Magaalada Muqdishu.

Jaantuska 3^{aad}: Qaybaha Dakhliga Gudaha

DAKHLIGA CANSHUURAHA

Dakhliga Canshuuraha ayaa loo kala qaadaa 4 qaybood oo kale ah; Cansuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, Cansuurta Agabka iyo Adeegga, Cansuurta Ganacsiga Dibadda iyo Canshuuraha kale. Cansuurta ugu badan dakhliga gudaha ayaa ah Cansuurta Ganacsiga Dibadda.

| Faah-Faahin | Dhabta Dakhliga Jan 2026 | Dhabta Dakhliga Jan 2025 | Koror/ Naaqus |
|--|--------------------------|--------------------------|---------------|
| Dakhliga Gudaha | 33,218,924 | 26,769,070 | 24% |
| Canshuuraha | 24,249,067 | 18,822,510 | 29% |
| Cansuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka | 3,471,427 | 2,426,887 | 43% |
| Cansuurta Agabka & Adeegga | 5,945,998 | 4,131,345 | 44% |
| Cansuurta Ganacsiga Dibadda | 14,502,392 | 12,002,026 | 21% |
| Canshuuraha Kale | 329,251 | 262,252 | 26% |
| Dakhliyada Kale | 8,969,857 | 7,946,560 | 13% |
| Dakhliga Hantida | - | - | |
| Dakhliga libka Agabka iyo Adeegga | 8,957,754 | 7,941,213 | 13% |
| Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha | 12,103 | 5,347 | 126% |
| Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyinka hadda jira aynu lee nahay | - | - | 0% |

Shaxda 3^{aad}: Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan ee sannadaha 2026 & 2025

CANSHUURTA DAKHLIGA IYO FAA'IIDOOYINKA

Canshuuraha Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, waxayna ka tahay **14%** dhabta Dakhliga Canshuuraha ee la helay bisha Jan sannadka 2026. Cansuurtaan ayaa laga qaadaa dakhliga soo gala qofka iyo shirkadaha, waxayna ka kala timaadaa, cansuurta mushaarka shaqaalaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah, cansuurta dakhliga kirooyinka daaraha iyo Cansuurta Faa'iidada shirkadaha.

Cansuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ayaa korartay **43%** bisha Jan sannadka 2026, waxaana la helay dakhli dhan **\$3.5M**, halka bisha Janaayo ee sannadka 2025 la helay **\$2.4M** kana hooseeyso **\$1M** cansuurta la helay bisha Jan 2026.

Canshuurta Faa'iidada Shirkadaha ayaa sameysay bisha Janaayo 2026 koror dhan **\$112K** una dhiganta **11%** wadarta kororka Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ee la helay bisha Janaayo 2026. Sidoo kale, canshuurta kirada daaraha ayaa la helay koror dhan **\$505K** una dhiganta **48%** wadarta kororka la helay ee Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, Canshuurta Mushaarka shaqaalaha ayaa la helay koror dhan **\$427K** oo u dhiganta **41%** wadarta kororka Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ee la helay bisha Janaayo 2025.

CANSHUURTA AGABKA IYO ADEEGGA

Waxaa la helay bisha Janaayo 2026 dakhli dhan **\$6M** oo ka badan tahay **44%** Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bisha Janaayo 2025. Waxayna ka tahay **25%** wadarta Dakhliga Canshuuraha. Waxaa laga qaadaa canshuurtaan ganacsiyada dalka waxaana ka mid ah; canshuurta gadista ee suuqyada, canshuurta wadamarista gawaarida iyo canshuurta gadista ee laga qaado shirkadaha bixiya adeegyada ganacsiga.

Canshuurta gadista ee badeecadaha kasoo daga dekadda iyo suuqyada ayaa laga helay bisha Janaayo 2026 dakhli dhan **\$5M** oo u dhiganta **79%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega. Canshuuraha Wado-marist iyo Nootaayooyinka ayaa laga helay **\$1.3M** oo u dhiganta **21%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeegga ee la soo uruuriyey bisha Jan 2026.


CANSHUURTA GANACSIGA DIBADDA

Waa canshuurta laga qaado badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha Muqdisho. Waana dakhliga ugu muhiimsan dakhliga Dawladda kasoo xarooda gudaha dalka. Wuxuuna ka yahay **44%** wadarta dakhliga gudaha ee la helay bisha janaayo sannadka 2026. Dakhliga la helay bisha Janaayo ee sannadka 2026 ayaa sare u kac sameeyey **21%** marka la barbardhigo wadarta dakhliga la helay bisha Janaayo ee sannadka 2025. Bisha Janaayo ee sannadka 2026 waxaa ka soo xarooday canshuur dhan **\$15M** oo u dhiganta **60%** wadarta Dakhliga Canshuuraha, waxayna lasoo xareeyey **8%** wadarta odoroska miisaaniyad sannadeedka Dakhliga Gudaha ee 2026.

CANSHUURAHA KALE

Miisaaniyad sannadeedka Canshuuraha kale ayaa laga helay **\$14M**, waxaana ka soo xarooday bisha Janaayo 2026 dhakhli dhan **\$329K** oo u dhiganta **2%** wadarta Dakhliga Canshuuraha kale ee miisaaniyad sannadeedka 2026. Dakhliga la helay bisha Jan 2026 ayaa **1%** ka ah wadarta dakhliga canshuuraha. Waxayna ka soo xarootaa canshuuraha laga qaado badqabka gawaarida, farankaboolada qaansheegooyinka ganacsiga ee adeegyada ama badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha.

Canshuuraha kale ee la soo uruuriyey bisha Janaayo ee sannadka 2026 ayaa **26%** sare u kacay marka la barbardhigo canshuuraha kale la helay bisha Jan ee sannadka 2025.



Sida ka muuqato jaantuska 4^{aad} oo soo bandhigaayo isbarbardhig qaybaha dakhliga canshuuraha ee la helay bisha Janaayo ee sannadaha 2026 iyo 2025, Wuxuuna kaloo muujinayaa kororka iyo naaquska qaybaha dakhliga canshuuraha marka la is barbardhigayo dakhliga canshuuraha la helay bisha Janaayo ee sannadaha 2026 iyo 2025.

Jaantuska 4^{aad}: Dakhliga Canshuuraha Jan 2026 & 2025

DAKHLIYADA KALE

Dakhliyada kale, waa dakhli ka soo xarooda adeegyada maamul oo ay bixiso Dawladda, sida bixinta shatiyada ganacsiga, adeegyada dekada iyo garoonka diyaaradaha, bixinta baasaboorada, iyo dalkugalka ajaanibta. Waxaana ka soo xarooday bisha Janaayo 2026 dakhli dhan **\$9M** oo ka badan **13%** dakhliyada kale ee la helay bisha Janaayo 2025.

Dakhliyada kale ee lasoo uruuriyey bisha Jan 2026, waxaa **\$5M** oo u dhiganta **57%** wadarta dakhliyada kale kasoo xarootay adeegyada maamul Dawladda ka bixiso Dekadda iyo Groonka diyaaradaha magaalada Muqdisho. Bixinta Baasaboorada iyo dalkugalka ajaanibta waxaa ka soo xarooday dakhli dhan **\$100K** oo **11%** ka ah wadarta dakhliyada kale. Diyaaradaha mara hawada Soomaaliya waxaa laga helay **\$2M** oo u dhiganta **19%** wadarta Dakhliyada Kale ee la helay bisha jan 2026. Khidmaha Isgaarsiinta ayaa laga helay **\$381K** oo u dhiganta **4%** wadarta dakhliyada kale.

Sida ka muuqato shaxda 3^{aad}, Dakhliga kasoo xarooday Ganaaxa iyo Ciqaabta ayaa kordhay **126%** bisha Jan 2026, waxaana la helay dakhli dhan **\$12K** halka bisha Jan ee sannadka 2025 la helay dakhli dhan **\$5K**.


DEEQAHA DIBADDA

Deeqaha Dibadda oo ka ah **65%** wadarta odoroska dakhliga miisaaniyadda Dawladda 2026, waxaa la helay **\$10M** oo u dhiganta **1%** miisaaniyad sannadeedka deeqaha dibadda. Wadarta deeqaaha dibadda ee la helay bisha Janaayo 2025 ayaa sare u kacay **92%**, marka loo fiiriyo wadarta deeqaha dibadda ee la helay bisha Janaayo 2025. Deeqaha dhinacyada badan ayaa la helay dakhli dhan **\$10M** kana badan **134%** deeqaha dhinacyada badan ee la helay bisha Janaayo 2025.

| Faah-Faahin | Dhabta Dakhliga Jan 2026 | Dhabta Dakhliga Jan 2025 | Koror/Naaqus |
|---|-----------------------------|-----------------------------|--------------|
| DEEQAHA DIBADDA | 10,031,126 | 5,216,496 | 92% |
| Deeqaha laba dhinac | - | 927,174 | -100% |
| Imaaraatka Carabta | - | 927,174 | -100% |
| Deeqaha Dhincacyada badan | 10,031,126 | 4,289,322 | 134% |
| Bangiga Adduunka | 9,095,125 | 4,082,851 | 123% |
| Hay'ada Waxbarashada Addunnka (GPE) | 911,051.18 | 206,471 | 341% |
| Mashruuca Xoojinta Xogta Cilmi baarista | 24,950.00 | - | |

Shaxda 4^{aad}: Deeqaha Dibadda Jan 2026 & 2025

Deeqaha dibadda waxay isugu jirtaa deeq kab miisaaniyadeed oo ay Dawladdu ka hesho hay'ado caalami ah iyo Dawladaha kabo miisaaniyadda Dawladda iyo kab mashaariic oo loogu talagalay in lagu maalgaliyo mashaariicda laga fuliyo dalka gudahiisa. Sida ka muuqato shaxda 4^{aad} Deeqaha dhincacyada badan ee la helay bisha Jan 2026 Bangiga Adduunka ayaa Dawladda ugu deeqay **\$9M** oo u dhiganta koror dhan **123%** marka la barbardhigo deeqda la helay bisha Jan 2025. Hay'ada Waxbarashada Addunnka (GPE) aya Dawladda ugu deeqday **911k** una dhiganto **341%** koror ah marka loo fiiriyo wadarta deeqaha ay bixisay hay'add bisha Janaayo 2025. Sidoo kale shaxda 4^{aad} waxuu ku tusinayaa in Mashruuca Xoojinta Xogta Cilmi barista ay ka soo xarootay dakhli dhan **25K** bisha Jan 2026.



Shaxda 5^{aad}, waxay muujinaysaa isbarbardhig deeqaha dibadda ee la helay bisha Janaayo ee sannadaha 2026 iyo 2025. Waxaana la helay koror dhan 92% deeqda la helay bisha Jan 2026.

Jaantuska 5^{aad}: Deeqaha Dibadda Jan 2026 & 2025

DHABTA KHARASHAADKA JAN- EE MIISAANIYADDA SANNADKA 2026

| | Faah-Faahin | Dhabta Jan 2025 | Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala Wareejimaha | Kutalagalka Miisaaniyadda | % Fulinta |
|----|--|---------------------|---|---------------------------|-----------|
| | Kharashaadka Joogtada | | | | |
| 21 | Mushaarka Shaqaalaha | 21,027,508 | 351,360,414 | 375,670,974 | 6% |
| 22 | Isticmaalka Agabka & Adeega | 1,501,167 | 206,046,482 | 181,435,878 | 1% |
| 24 | Dulsaarka | - | 6,715,000 | 7,000,000 | 0% |
| 25 | Kaalmo Dhaqaale | - | - | - | 0% |
| 26 | Deeqaha | 2,975,828 | 90,141,266 | 90,141,266 | 3% |
| 27 | Faa'idada Bulshada | - | 10,000,000 | 10,000,000 | 0% |
| 31 | Hantida aan Maaliyadda Ahayn | - | 18,125,622 | 18,140,666 | 0% |
| | Wadarta Kharashaadka Joogtada | 25,504,502 | 682,388,785 | 682,388,785 | 4% |
| | Kharashaadka Mashaariicda | | | | 0% |
| 21 | Mushaarka Shaqaalaha | - | 3,640,400 | 3,640,400 | 0% |
| 22 | Isticmaalka Agabka & Adeega | 149,997 | 289,907,080 | 289,907,080 | 0% |
| 25 | Kaalmo Dhaqaale | - | 8,660,000 | 8,660,000 | 0% |
| 26 | Deeqaha | - | 169,426,273 | 170,096,273 | 0% |
| 27 | Faa'idada Bulshada | - | 670,000 | - | 0% |
| 28 | Other expenses | - | 34,105,110 | 34,105,110 | 0% |
| 31 | Hantida aan Maaliyadda Ahayn | - | 198,009,595 | 198,009,595 | 0% |
| | Wadarta Kharashaadka Mashaariicda | 149,997 | 704,418,458 | 704,418,458 | 0% |
| | Wadarta Kharashaadka Guud | \$25,654,499 | \$1,386,807,242 | \$1,386,807,242 | 2% |
| | Lacag Bixinnada Kale | | | | |
| 32 | Hantida Maaliyadeed | - | - | - | - |
| 29 | Dib u bixin Daymaha/Horumaris | - | - | - | - |
| | Wadarta Lacag Bixinnada Kale | - | - | - | - |
| | Wadarta Lacag Bixinta Guud | \$25,654,499 | \$1,386,807,242 | \$1,386,807,242 | 2% |

Shaxda 5^{aad}: Dhabta & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda Jan- 2026.

Kharashaadka Dawladda waxaa loo kala qaadaa, kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Kharashaadka joogtada ah waa kharashaadka Dawladda ee laga maalgaliyo dakhliga gudaha iyo kabka miisaaniyadeed oo ay Dawladdu ka hesho deeqaha dibabadda. Waxaa laga bixiyaa kharashaadka socodsiiinta hawlaha Dawladda, sida mushaaraadka shaqaalaha, Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee hay'adaha Dawladda. Kharashaadka Mashaariicda waxaa laga maalgaliyaa kabka mashaariicda ee Dawladda ka hesho deeqaha dibadda.

KHARASHKA BISHA JANUARY 2026

Sida ka muuqato shaxda 5^{aad} waxaa la bixiyey bisha January 2026 kharash dhan **\$26M**. kharashaadka joogtada ah waxaa laga bixiyey **\$26M** oo u dhiganta **99%** wadarta kharashaadka guud, halka kharashaadka mashaariicdana laga bixiyey **\$150k** oo u dhiganta **0.6%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha January 2025.

Mushaarka shaqaalaha ayaa ugu badan kharashaadka la bixiyey bisha January waxaana la bixiyey **\$21M** oo u dhiganta **82%** wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$1M** oo u dhiganta **6%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha January 2025. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa lagu bixiyey **\$3M** oo **12%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha January 2025.

Kharashaadka mashaariicda ayaa la bixiyey bisha January 2025 kharash dhan **\$150k** oo u dhiganta **0.6%** wadarta kharashaadka guud. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa lagu bixiyey **\$150k** oo u dhiganta **100%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha January 2025.


KHARASHAADKA GUUD JAN-2026

Kharashaadka la bixiyey bisha Janaayo 2026 ayaa aha **\$26M** oo u dhiganta **2%** miisaaniyadda kharashaadka guud ee la bixiyey bisha Jan 2026. Kharashaadka Joogtada ah ayaa la bixiyey **\$25.5M** oo u dhiganta **99%** miisaaniyadda kharashaadka guud, halka mashaariicda laga bixiyey **\$150M** oo u dhiganta **1%** miisaaniyadda kharashaadka guud ee la bixiyey bisha Jan 2026.

KHARASHAADKA JOGTADA AH

Musharaadka shaqaalaha Dawladda ayaa lagu bixiyey **\$21M** oo u dhiganta **6%** miisaaniyad sannadeedka Mushaarka shaqaalaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, wuxuuna ka yahay **82%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Janaayo 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **\$1M** oo u dhiganta **1%** miisaaniyadda Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee kharashaadka joogtada ah, wuxuuna **6%** ka yahay wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey.

Sida ka muuqato jaantuska 6^{aad} oo soo bandhigaya isbarbardhig kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Jan ee sannadaha 2026 & 2025.




Bisha Jan 2026 wuxuu muujinayaa jaantuska 6^{aad} koror kharash bixinta ah ee la bixiyey sannadka 2026 marka labarbardhigo kharashaadka joogtada ee la bixiyey isla bisha Jan ee sannadka 2025.

Waxaa labixiye bisha Jan Kharash dhan **26M** wuxuuna kabadan yahay **9%** Marka loo fiiriyo wadarta kharashaadka joogtada ah ee bisha Jan ee sanadkii hore 2025.

Jaantuska 6^{aad}:Kharashaadka Joogtada ah, Bisha Jan - 2026 & 2025

KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bilaha January ayaa ahayd **\$150k** oo u dhiganta **0.2%** miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka mashaariicda. waxayna ka tahay **0.6%** wadarta kharashaadka guud.



Jaantuska 7^{aad}: Kharashaadka Mashaariicda, Bilaha Jan-Juun - 2026 & 2025

Sida ka muuqato jaantuska 7^{aad}, oo isbarbardhig ku samaynayaa kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Janaayo e sannadka 2026, waxaa ka muuqda koror dhanka kharash bixinta mashaariicda, Bishan Jan 2025 Kharash dhan **150K** wuxuna ka badan yahay **624%** Marka loo fiiriyo wadarta kharashaadka Mashaariicda ah ee bisha Jan ee sannadkii hore 2025

ISBARBARDHIGA KHARASH BIXINTA BISHA JANUARY EE 2026 & 2025

| | Faahfaahin | Dhabta Jan 2026 | Dhabta Jan 2025 | Increase/Decrease |
|----|--|---------------------|---------------------|-------------------|
| | Kharashaadka Joogtada | | | |
| 21 | Mushaarka Shaqaalaha | 21,027,508 | 20,141,134 | 4% |
| 22 | Isticmaalka Agabka & Adeega | 1,501,167 | 1,448,748 | 4% |
| 26 | Deeqaha | 2,975,828 | 1,816,455 | 64% |
| | Wadarta Kharashaadka Joogtada | 25,504,502 | 23,406,336 | 9% |
| | Kharashaadka Mashaariicda | | | |
| 22 | Isticmaalka Agabka & Adeega | 149,997 | 20,725 | 624% |
| | Wadarta Kharashaadka Mashaariicda | 149,997 | 20,725 | 624% |
| | Wadarta Kharashaadka Guud | \$25,654,499 | \$23,427,061 | 10% |
| | Lacag Bixinnada Kale | | | |
| 32 | Hantida Maaliyadeed | - | - | - |
| 29 | Dib u bixin Daymaha/Horumaris | - | - | - |
| | Wadarta Lacag Bixinnada Kale | - | - | - |
| | Wadarta Lacag Bixinta Guud | \$25,654,499 | \$23,427,061 | 10% |

Shaxda 6^{aad}: Kharashaadka la bixiyey Bisha January 2026 iyo 2025.

Sida ka muuqato shaxda 6^{aad} oo isbarbardhigaysa kharashaadkii la bixiyey bisha January ee sannadaha 2026 iyo 2025. Wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey ayaa kordhay **10%** bisha January 2026 marka la barbardhigo wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha January ee sannadka 2025.

Wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha January 2026 ayaa korortay **9%** marka loo fiiriyo wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha January ee sannadka 2025. Kharashaadka mashariicda ayaa la bixiyey **\$150k** waxayna **624%** ka badan tahy wadarta kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bisha January 2025.

Kharashaadka joogtada, Mushaarka Shaqaalaha ee la bixiyey bisha January 2026 ayaa ahayd **\$21M** oo **4%** oo ka saraysa kharashaadka joogtada ee mushaarka shaqaalaha ee la bixiyey bisha January 2025.

Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bisha January 2026 ayaa ahaa **\$1M** wuxuuna **4%** ka sareeyaa kharashaadka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bisha January 2025.

Dhammaan kharashaadka mashaariicda ayaa kordhin marka laga reebo kharashaadka Isticmaalka Agabka & Adeega ee la bixiyey bisha January 2026, marka labarbardhigo kharashaadkii la bixiyey bisha January 2025. Kharashadka Isticmaalka Agabka & Adeega ayaa kordhay **624%**.

DHABTA KHARASHAADKA BISHA JAN, HAY'ADAHA DAWLADDA

Shaxda 8^{aad} waxaa ka muuqdo dhabta kharashadka guud ee Dawladda ee la bixiyey bisha Janaayo 2026, iyadoo loo kala saarayo sida ay u isticmaaleen qaybaha shaqo ee loo kala qaybiyo hay'adaha Dawladda. Sidoo kale kharashaadka waxaa loo kala qaaday kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Bisha Janaayo 2026, waxaa la bixiyey kharash dhan **\$26M** oo u dhigma **2%** wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka Guud ee Dawladda.

| Faah-faahinta | Dhabta Kharashka Jan 2026 | Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala Wareejimaha | Kutalagalka Miisaaniyadda | % Fulinta |
|----------------------------------|------------------------------|---|------------------------------|-----------|
| KHARASHKA GUUD | \$ 25,654,499 | \$1,386,807,242 | \$ 1,386,807,242 | 2% |
| Kharashaadka Joogtada | 25,504,502 | 682,388,785 | 682,388,785 | 4% |
| Hay'adaha Adeeg Maamulka | 8,016,770 | 293,026,361 | 297,383,037 | 3% |
| Hay'adaha Adeeg Amniga | 16,763,034 | 275,536,154 | 271,333,393 | 6% |
| Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha | 466,657 | 49,963,874 | 49,809,959 | 1% |
| Hay'adaha Adeeg Bulshada | 258,042 | 63,862,395 | 63,862,395 | 0% |
| Kharashaadka Mashaariicda | 149,997 | 704,418,458 | 704,418,458 | 0% |
| Hay'adaha Adeeg Maamulka | 36,093 | 154,906,604 | 154,906,604 | 0% |
| Hay'adaha Adeeg Amniga | - | - | - | 0% |
| Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha | 96,286 | 345,474,219 | 345,474,219 | 0% |
| Hay'daha Adeeg Bulshada | 17,618 | 204,037,635 | 204,037,635 | 0% |

Shaxda 7^{aad}: Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda

KHARASHAADKA JOOGTADA AH

Kharashka ugu badan ee la bixiyey waxaa laga bixiyey miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, waxaana la bixiyey kharash dhan **\$25M** oo u dhiganta **4%** wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Janaayo 2026. Kharashaadka joogtada ee la bixiye ayaa ka ahaa **99%** ka ahaa wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha Janaayo 2025.

Bisha Janaayo ayaa Hay'adaha Amniga lagu bixiyey **\$17M** oo u dhiganta **6%** miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah. Miisaaniyada Hay'adaha Adeegga Maamulka ayaa laga bixiyey **\$8M** oo u dhiganta **3%** miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah ee Hay'adaha Adeegga Maamulka. Hay'adaha Dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey **\$466k** oo u dhiganta **1%**, Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey **258M** oo u dhiganta **0%** miisaaniyad sannadeedka Hay'adaha Bulshada.

Kharashaadka ugu badan ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Janaayo 2026 waxaa lagu bixiyey Hay'adaha Adeegga Amniga, waxaana ku baxday, **\$17M** oo **66%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey bisha Janaayo 2025. Hay'adaha maamulka ayaa lagu bixiyey kharash labaad ee ugu badan waxaana ku baxday **\$8M** oo **31%** wadarta kharashaadka joogtada ah, Ha'aydadaha Dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey **\$466k** oo **2%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah, halka Hay'adaha Bulshada lagu bixiyey **\$258M** oo **1%** ka ah wadarta kharashaadka la bixiyey bisha Janaayo 2025.

KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Kharashaadka Mashaariicda ayaa lagu bixiyey **\$150K** oo u dhiganta **0.02%** miisaaniyad sannadeedka kharashaadka mashaariicda, waxayna ka tahay **0.6%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ee 2025.

Mashaariicda hoos yimaado hay'adaha maamulka ayaa laga bixiyey **\$36K** oo u dhiganta **0.02%** miisaaniyadda mashaariicda ee hay'adaha Maamulka. Mashaariicda hoos yimaada hay'adaha dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey **\$96K** oo u dhiganta **0.03%** miisaaniyada mashaariicda ee hay'adaha dhaqaalaha. Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey **\$17.6K** oo u dhiganta **0%** miisaaniyadda mashaariicda ee hay'adaha bulshada.

DHAMMAAD

Lifaaqa 1^{aad}: Faahfaahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah Jan.

| Madaxa | Faahfaahinada | Dhabta Jan | Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala Wareejimaha | Kutalagalka Miisaaniyadda | % |
|----------------|---|------------------|---|---------------------------|-----------|
| 010100 | Xafiiska Madaxtooyada | 540,433 | 12,597,366 | 12,417,366 | 4% |
| 00000 | Undefined | 540,433 | 12,597,366 | 12,417,366 | 4% |
| | Mushaarka Shaqaalaha | 540,433 | 6,504,072 | 6,504,072 | 8% |
| 2111 | Mushaarka - Lacag Cadaan ah | 77,515 | 938,328 | 938,328 | 8% |
| 2113 | Gunnoyin Lacag Cadaan ah | 458,148 | 5,508,504 | 5,508,504 | 8% |
| 2114 | Kharashaadka kale ee Shaqaalaha | 4,770 | 57,240 | 57,240 | 8% |
| | Isticmaalka Agabka iyo Adeegga | - | 6,060,523 | 5,880,523 | 0% |
| 2211 | Kharashka Safarka iyo Shirarka | - | 1,425,000 | 1,425,000 | 0% |
| 2221 | Hawlaha Guud | - | 323,492 | 323,492 | 0% |
| 2222 | Isgaarsiinta | - | - | - | 0% |
| 2223 | Shidaalka iyo Saliidaha | - | 737,959 | 737,959 | 0% |
| 2224 | Agabka iyo Alaabaha | - | 18,700 | 18,700 | 0% |
| 2225 | Dayactir iyo Hagaajin | - | 36,000 | 36,000 | 0% |
| 2231 | Kirooyin | - | 180,000 | 60,000 | 0% |
| 2241 | Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda | - | - | - | 0% |
| 2242 | Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta | - | 2,297,520 | 2,297,520 | 0% |
| 2261 | Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada | - | 1,041,852 | 981,852 | 0% |
| | Deeqaha | - | 32,771 | 32,771 | 0% |
| 2621 | Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah | - | 32,771 | 32,771 | 0% |
| 010201 | Xafiiska Golaha Shacabka | 1,799,960 | 28,004,201 | 28,004,201 | 6% |
| 0102011 | Governance and Administration (Lower House) | 241,960 | 6,657,371 | 26,641,961 | 4% |
| | Mushaarka Shaqaalaha | 241,960 | 3,674,760 | 22,437,960 | 7% |
| 2111 | Mushaarka - Lacag Cadaan ah | 177,245 | 2,167,080 | 2,167,080 | 8% |
| 2113 | Gunnoyin Lacag Cadaan ah | 64,715 | 1,507,680 | 20,270,880 | 4% |
| 2114 | Kharashaadka kale ee Shaqaalaha | - | - | - | 0% |
| | Isticmaalka Agabka iyo Adeegga | - | 2,066,936 | 3,288,326 | 0% |
| 2211 | Kharashka Safarka iyo Shirarka | - | - | 562,500 | 0% |
| 2221 | Hawlaha Guud | - | 295,250 | 295,250 | 0% |
| 2222 | Isgaarsiinta | - | - | - | 0% |
| 2223 | Shidaalka iyo Saliidaha | - | 491,520 | 245,760 | 0% |
| 2224 | Agabka iyo Alaabaha | - | 235,200 | 117,600 | 0% |
| 2225 | Dayactir iyo Hagaajin | - | 251,526 | 45,116 | 0% |
| 2231 | Kirooyin | - | 243,600 | 243,600 | 0% |
| 2241 | Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda | - | - | 280,000 | 0% |
| 2242 | Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta | - | 36,000 | 36,000 | 0% |
| 2261 | Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada | - | 513,840 | 1,462,500 | 0% |
| | Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn | - | 915,675 | 915,675 | 0% |
| 3111 | Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka | - | 885,675 | 885,675 | 0% |
| 3112 | Qalabka iyo Mashinadda | - | 30,000 | 30,000 | 0% |
| 3113 | Hantida kale ee Maguurtada ah | - | - | - | 0% |
| 0102012 | Lower House Parliamentary Core Business | 1,558,000 | 21,346,830 | 1,362,240 | 7% |
| | Mushaarka Shaqaalaha | 1,558,000 | 18,763,200 | - | 8% |
| 2111 | Mushaarka - Lacag Cadaan ah | - | - | - | 0% |

| Madaxa | Faahfaahinada | Dhabta Jan | Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala Wareejimaha | Kutalagalka Miisaaniyadda | % |
|----------------|--|----------------|---|---------------------------|------------|
| 2113 | Gunnoyin Lacag Cadaan ah | 1,558,000 | 18,763,200 | - | 8% |
| 2114 | Kharshaadka kale ee Shaqaalaha | - | - | - | 0% |
| | Isticmaalka Agabka iyo Adeegga | - | 2,583,630 | 1,362,240 | 0% |
| 2211 | Kharashka Safarka iyo Shirarka | - | 720,000 | 157,500 | 0% |
| 2221 | Hawlaha Guud | - | - | - | 0% |
| 2222 | Isgaarsiinta | - | - | - | 0% |
| 2223 | Shidaalka iyo Saliidaha | - | - | 245,760 | 0% |
| 2224 | Agabka iyo Alaabaha | - | - | 117,600 | 0% |
| 2241 | Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda | - | 120,090 | 46,500 | 0% |
| 2242 | Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta | - | - | - | 0% |
| 2261 | Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada | - | 1,743,540 | 794,880 | 0% |
| 010202 | Xafiiska Aqalka Sare | 303,400 | 7,973,196 | 7,973,196 | 4% |
| 0102021 | Governance and Administration (Senate) | - | 4,274,696 | 5,139,396 | 0% |
| | Mushaarka Shaqaalaha | - | 1,905,696 | 1,905,696 | 0% |
| 2111 | Mushaarka - Lacag Cadaan ah | - | 161,280 | 161,280 | 0% |
| 2113 | Gunnoyin Lacag Cadaan ah | - | 1,744,416 | 1,744,416 | 0% |
| 2114 | Kharshaadka kale ee Shaqaalaha | - | - | - | 0% |
| | Isticmaalka Agabka iyo Adeegga | - | 1,609,800 | 2,474,500 | 0% |
| 2211 | Kharashka Safarka iyo Shirarka | - | 393,600 | 393,600 | 0% |
| 2221 | Hawlaha Guud | - | 147,600 | 147,600 | 0% |
| 2222 | Isgaarsiinta | - | - | - | 0% |
| 2223 | Shidaalka iyo Saliidaha | - | 267,000 | 267,000 | 0% |
| 2224 | Agabka iyo Alaabaha | - | 259,200 | 244,800 | 0% |
| 2225 | Dayactir iyo Hagaajin | - | 36,000 | 34,200 | 0% |
| 2231 | Kirooyin | - | 194,400 | 194,400 | 0% |
| 2241 | Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda | - | - | - | 0% |
| 2242 | Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta | - | 48,000 | 48,000 | 0% |
| 2261 | Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada | - | 264,000 | 1,144,900 | 0% |
| | Soo iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn | - | 759,200 | 759,200 | 0% |
| 3111 | Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka | - | 703,200 | 703,200 | 0% |
| 3112 | Qalabka iyo Mashiinadda | - | - | - | 0% |
| 3113 | Hantida kale ee Maguurtada ah | - | 56,000 | 56,000 | 0% |
| 0102022 | Upper House Parliamentary Core Business | 303,400 | 3,698,500 | 2,833,800 | 8% |
| | Mushaarka Shaqaalaha | 303,400 | 2,817,600 | 2,817,600 | 11% |
| 2111 | Mushaarka - Lacag Cadaan ah | - | - | - | 0% |
| 2113 | Gunnoyin Lacag Cadaan ah | 303,400 | 2,817,600 | 2,817,600 | 11% |
| 2114 | Kharshaadka kale ee Shaqaalaha | - | - | - | 0% |
| | Isticmaalka Agabka iyo Adeegga | - | 880,900 | 16,200 | 0% |
| 2224 | Agabka iyo Alaabaha | - | - | 14,400 | 0% |
| 2225 | Dayactir iyo Hagaajin | - | - | 1,800 | 0% |
| 2261 | Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada | - | 880,900 | - | 0% |
| 010300 | Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha | - | 11,317,156 | 11,062,156 | 0% |
| 00000 | Undefined | - | 11,167,156 | 11,062,156 | 0% |
| | Mushaarka Shaqaalaha | - | 3,843,072 | 3,822,072 | 0% |
| 2111 | Mushaarka - Lacag Cadaan ah | - | 962,229 | 954,144 | 0% |

| Madaxa | Faahfaahinada | Dhabta Jan | Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala Wareejimaha | Kutalagalka Miisaaniyadda | % |
|---------------|--|------------|---|---------------------------|-----------|
| 2113 | Gunnoyin Lacag Cadaan ah | - | 2,860,443 | 2,847,528 | 0% |
| 2114 | Kharshaadka kale ee Shaqaalaha | - | 20,400 | 20,400 | 0% |
| | Isticmaalka Agabka iyo Adeegga | - | 7,084,084 | 7,000,084 | 0% |
| 2211 | Kharashka Safarka iyo Shirarka | - | 1,020,000 | 1,020,000 | 0% |
| 2221 | Hawlaha Guud | - | 459,400 | 459,400 | 0% |
| 2222 | Isgaarsiinta | - | - | - | 0% |
| 2223 | Shidaalka iyo Saliidaha | - | 679,748 | 679,748 | 0% |
| 2224 | Agabka iyo Alaabaha | - | 280,244 | 280,244 | 0% |
| 2225 | Dayactir iyo Hagaajin | - | 40,000 | 40,000 | 0% |
| 2231 | Kirooyin | - | - | - | 0% |
| 2241 | Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda | - | - | - | 0% |
| 2242 | Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta | - | 3,251,400 | 3,167,400 | 0% |
| 2261 | Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada | - | 1,353,292 | 1,353,292 | 0% |
| | Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn | - | 240,000 | 240,000 | 0% |
| 3111 | Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka | - | - | - | 0% |
| 3112 | Qalabka iyo Mashinada | - | - | - | 0% |
| 3113 | Hantida kale ee Maguurtada ah | - | 240,000 | 240,000 | 0% |
| 103161 | National Center for Combating Terrorism & Preventing Radical Ideology in Tubsan | - | 150,000 | - | 0% |
| | Isticmaalka Agabka iyo Adeegga | - | 150,000 | - | 0% |
| 2211 | Kharashka Safarka iyo Shirarka | - | - | - | 0% |
| 2221 | Hawlaha Guud | - | - | - | 0% |
| 2242 | Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta | - | 150,000 | - | 0% |
| 010400 | Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga | - | 4,530,203 | 4,530,203 | 0% |
| 00000 | Undefined | - | 4,530,203 | 4,530,203 | 0% |
| | Mushaarka Shaqaalaha | - | 2,943,720 | 2,943,720 | 0% |
| 2111 | Mushaarka - Lacag Cadaan ah | - | 1,986,060 | 1,986,060 | 0% |
| 2113 | Gunnoyin Lacag Cadaan ah | - | 957,660 | 957,660 | 0% |
| 2114 | Kharshaadka kale ee Shaqaalaha | - | - | - | 0% |
| | Isticmaalka Agabka iyo Adeegga | - | 1,586,483 | 1,586,483 | 0% |
| 2211 | Kharashka Safarka iyo Shirarka | - | 480,000 | 480,000 | 0% |
| 2221 | Hawlaha Guud | - | 132,083 | 132,083 | 0% |
| 2222 | Isgaarsiinta | - | - | - | 0% |
| 2223 | Shidaalka iyo Saliidaha | - | 96,000 | 96,000 | 0% |
| 2224 | Agabka iyo Alaabaha | - | 97,500 | 97,500 | 0% |
| 2225 | Dayactir iyo Hagaajin | - | 16,160 | 16,160 | 0% |
| 2231 | Kirooyin | - | 81,000 | 81,000 | 0% |
| 2241 | Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda | - | - | - | 0% |
| 2242 | Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta | - | 589,740 | 589,740 | 0% |
| 2261 | Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada | - | 94,000 | 94,000 | 0% |
| 010401 | Safaaradaha | - | 5,235,689 | 5,235,689 | 0% |
| 00000 | Undefined | - | 5,235,689 | 5,235,689 | 0% |
| | Mushaarka Shaqaalaha | - | 4,372,260 | 4,372,260 | 0% |
| 2111 | Mushaarka - Lacag Cadaan ah | - | 1,538,460 | 1,538,460 | 0% |
| 2113 | Gunnoyin Lacag Cadaan ah | - | 2,833,800 | 2,833,800 | 0% |

| Madaxa | Faahfaahinada | Dhabta Jan | Isbadalka Miisaaniyadda ee Kala Wareejimaha | Kutalagalka Miisaaniyadda | % |
|----------------|--|------------|---|---------------------------|-----------|
| 2114 | Kharshaadka kale ee Shaqaalaha | - | - | - | 0% |
| | Isticmaalka Agabka iyo Adeegga | - | 863,429 | 863,429 | 0% |
| 2211 | Kharashka Safarka iyo Shirarka | - | 264,000 | 264,000 | 0% |
| 2221 | Hawlaha Guud | - | 166,925 | 166,925 | 0% |
| 2222 | Isgaarsiinta | - | - | - | 0% |
| 2223 | Shidaalka iyo Saliidaha | - | 159,327 | 159,327 | 0% |
| 2224 | Agabka iyo Alaabaha | - | 89,327 | 89,327 | 0% |
| 2225 | Dayactir iyo Hagaajin | - | - | - | 0% |
| 2231 | Kirooyin | - | 86,925 | 86,925 | 0% |
| 2261 | Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada | - | 96,925 | 96,925 | 0% |
| 010500 | Wasaaradda Maaliyadda | - | 17,301,322 | 17,301,322 | 0% |
| 0105001 | Governance and Administration (MOF) | - | 12,420,430 | 13,678,630 | 0% |
| | Mushaarka Shaqaalaha | - | 7,716,060 | 8,522,460 | 0% |
| 2111 | Mushaarka - Lacag Cadaan ah | - | 883,392 | 883,392 | 0% |
| 2113 | Gunnyoin Lacag Cadaan ah | - | 6,582,228 | 7,388,628 | 0% |
| 2114 | Kharshaadka kale ee Shaqaalaha | - | 250,440 | 250,440 | 0% |
| | Isticmaalka Agabka iyo Adeegga | - | 4,388,370 | 4,840,170 | 0% |
| 2211 | Kharashka Safarka iyo Shirarka | - | 340,000 | 340,000 | 0% |
| 2221 | Hawlaha Guud | - | 797,320 | 797,320 | 0% |
| 2222 | Isgaarsiinta | - | 24,000 | 24,000 | 0% |
| 2223 | Shidaalka iyo Saliidaha | - | 216,000 | 216,000 | 0% |
| 2224 | Agabka iyo Alaabaha | - | 940,507 | 940,507 | 0% |
| 2225 | Dayactir iyo Hagaajin | - | 365,599 | 365,599 | 0% |
| 2231 | Kirooyin | - | 384,000 | 384,000 | 0% |
| 2241 | Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda | - | - | - | 0% |
| 2242 | Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta | - | - | 451,800 | 0% |
| 2261 | Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada | - | 1,320,944 | 1,320,944 | 0% |
| | Soo iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn | - | 316,000 | 316,000 | 0% |
| 3111 | Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka | - | - | - | 0% |
| 3112 | Qalabka iyo Mashinada | - | - | - | 0% |
